# Hadda waa waqtigii aad gacmaha shaatigaaga aad kor u laalaaban lahayd oo aad shaqo geli lahayd.

## *Tani waa barnaamijkii doorashada  Kokoomus (Xisbiga Isbaheysiga Qaranka), laakiin waxaan jeclaan lahayn in aan ugu yeerno warqad shaqo. Hadda waxa la dareemaya in uu dhamaaday waqtigii ballamaha beenta la samayn jiray, waana waqtigii wax la qaban lahaa. Waa waqtigii aad gacmaha shaatigaaga aad kor u laalaaban lahayd oo aad shaqo geli lahayd.*

## *Qof walba waa la soo dhaweynayaa, sababtoo ah Finland dhammaanteen way ina saamaysaa.*

### Madasha doorashada Kokoomus (Xisbiga Isbaheysiga Qaranka) ee 2023.

Kokoomus (Xisbiga Isbaheysiga Qaranku) wuxuu rabaa in uu Finland u qaado jiho cusub. Waa inaan joojinaa qaadashada deymaha si aan u ilaalino adeegyada bulsho badqabta Tani waxay noo ogolaanaysaa inaan maalgelin ku samayno daryeelka wanaagsan ee dadka waayeelka iyo adeegyada caafimaadka. Waa inaan ka dhignaa Finland mid leh awood aad u sarayso oo dhanka nadaafada iyo tamarta sugan ah si aan u hubinno in guryaha iyo shirkaduhu ay heli doonaan koronto ku filan oo qiimo fiican lagu helo xitaa xilliga qaboobaha ee bartamaha jiilaalka. Dhaqaalaha iyo heerka nolosha Finland waxay u baahan yihiin in lagu jiheeyo inay korto. Cashuurta shaqadu waxay u baahan tahay in la fududeeyo si dadka loogu ogolaado in ay kaydsadaan in ka badan oo mushaharkooda ah. Finland waa in ay ahaato waddan nabdoon oona yaqaano sida loo ilaaliyo xuduudihiisa. Waxaan rabnaa in ubad kastaa u helo bilow wanaagsan oo nolosha ah iyada oo loo marayo waxbarasho tayo leh.

### Warqad shaqo oo ka kooban 10 qodob ee Kokoomus (xisbiga Isbaheysiga Qaranka) Finland:

1. **Waxaan joojin doonaa ku noolaanshaha lacagta lasoo amaahday.** Waxaan qori doonnaa barnaamij soo kabasho dhaqaale oo soconaya laba xilli oo baarlamaan si loo dheellitiro dhaqaalaha guud ee Finland loona joojiyo deymaha 2030.
2. **Waxaan ka dhigi doonaa mid faa'iido leh in lagu shaqeeyo xaalad kasta.** Waxaan dib u habeyn ku sameyn doonaa canshuuraha iyo sooshiyaal sekiyuuritiga si ugu yaraan kala bar Euro kasta oo lagu kasbado shaqada ay u harto shaqaalaha.
3. **Waxaan ka khafiifin doonaa cashuurta shaqada dhammaan qaybaha dakhliga.** Marka si sax ah loo qoondeeyo, dhimista canshuurtu waxay kor u qaadaysaa kobaca dhaqaalaha waxayna dhiirigelisaa shaqo qabashada, sidaas darteed qaar ka mid ah qiimihii canshuur dhimista waxay ku soo celisaa dawladda. Kama dhigi doono canshuur dhimista inay deyn na galiso. Waxaan ka wareejin doonaa diirad saarista cashuur ka qaadista shaqaalaha iyo ganacsatada inagoo u wareejinayso walxaha leh waxyeello, qiiqa iyo waxlaha la isticmaalo.
4. **Waxaan hubin doonnaa in dadka reer Finland ay heli karaan koronto qiima jaban.** Waxaan dib u habeyn ku sameyn doonaa moodheelka suuqa korontada iyo qiimeynta si ay u noqdaan kuwo cadaalad ah, si qoysaska iyo shirkaduhu ay u helaan biilal koronto oo yaryar. Wax soo saarka ugu qaalisan ee korantada waa inaysan go'aamin qiimaha dhammaan korontada. Waxaan hubin doonnaa in korontada laga hela Findland ee la awoodi karo, nadiiftana ah aysan dhammaanin xitaa xilliga qaboobaha daran lagu jiro.

5. **Waxaan si hufan ula dagaalami doonaa isbeddelka cimilada.** Waxaan u hirgelin doonaa xakamaynta gaaska aqalka dhirta lagu koriyo si qiima ahaan hufan oona hab dhexdhexaad ka ah tignoolajiyada, marka loo eego shuruudaha suuqa - iyada oo aan waxyeello loo geysan heerka nolosha. Waxaan aqoonsan doonnaa raad-raaca muhiimka ah ee kaarboonka ee ay shirkadaha dadka reer Finland si aan ula dagaallano isbeddelka cimilada.
6. **Waxaan xaqiijin doonaa helida ilo ku filan dhanka difaaca qaranka Finland.** Waxaan hagaajin doonaa xaaladaha shaqada ee aaggaga difaaca gudaha iyo Yurub. Waxaan ballan qaadi doonaa inaan ku dhawrno kharashaadka difaaca ugu yaraan 2 boqolkiiba GDP. Waxaan balaadhin doonaa askar qorista si loogu daro dabakhada da' kasta. Waxaan hubin doonaa tayada dabakhada da'da ugu fiican inay ka qayb qaataan difaaca qaranka.
7. **Waxaan la dagaallami doonnaa takoorka, fal-dembiyeedka iyo falalka burcadda ee dhallinyarada, waxayna naga joojin doonnaa inaan ku socdaalno isla waddada ay qaadaylswiidhan.** Waxaan u adeegsan doonnaa cabbirro jilicsan iyo kuwo adag labadaba. Waxaan hagaajin doonaa adeegyada ka hortagga dhallinta, adeegyada ilaalinta carruurta iyo qaanuunada is-dhexgalka soogalootiga. Waxaan maalgelin doonaa caafimaadka dhimirka dhalinyarada iyo ka hortagga isticmaalka maandooriyaha. Waxaan kordhin doonnaa ciqaabta lagu qaado fal-dembiyeedyada gaangiska iyo dembiyada lagu geysto hubka.
8. **Waxaan hagaajin doonaa waxbarashadeena aasaasiga ah.** Marka ay timaado waxbarashada aasaasiga ah, waxaan maalgelin doonaa aasaaska: jawi waxbarasho oo nabdoon iyo taageerada ku filan ee shaqsiga la siiyo. Waxaan u ogolaan doonaa macalimiinteena inay diirada saaraan waxbarida ayna joojiyaan xumaynta natiijooyinka waxbarashadeena. Waxaan hubin doonaa in ardayda ka qalin jebisa waxbarashada aasaasiga ah ay leeyihiin xirfadaha iyo aqoonta ku filan.
9. **Waxaan ka dhigi doonaa adeegyada bulshada iyo daryeelka caafimaad kuwo si fudud loo heli karo.** Adeegyada waxaa lagu heli doonaa si ka fudud iyadoo loo marayo la-talin fogaan arag ah oo kumbuyuutar la isticmaalayo iyo adeegyada kale ee dhijitaalka ah.
10. **Waxaan hubin doonaa in dhammaan dadka waayeelka ay ku kori karaan si sharaf leh.** Waxaan hagaajin doonaa daryeelka mar walba ah, adeegyada guryeynta, daryeelka guriga, iyo daryeelka lagu tiirsan yahay. Waxaan taageeri doonaa la qabsiga daryeelayaasha. Waxaan hubin doonaa in dadka waayeelka ay joogteeyaan qaab nololeed firfircoon.